



Cusboonaysiinta Mashruuca Casriyeynta Ida B. Wells Gu'ga 2024

Qoysaska Dugsiga Sare Ida B. Wells & Kooxda Ida B. Wells ee qaaliga ah,

Maadaama mashruuca Casriyeynta IBW uu galayo xilliga xagaaga waxaan rabnay inaan ku siino cusboonaysiinta mashruuca. Shaqada naqshadeynta oo faahfaahsan ayaa hadda ka socota dhismaha cusub ee afarta dabaq ah ee IBW oo leh goobo waxbarasho oo casri ah iyo taageero, oo ay ku jiraan goobo waxbarasho oo khaas ah oo loogu talagalay barnaamijyada Waxbarashada Farsamada Xirfadeed ee gaarka ah [CTE]. Goobta orodka iyo garoonku waxa loo rari doonaa meel kale, si loo abuuro hab soo dhawayn badan oo kambaska laga bilaabo dhinaca Capitol Highway ee goobta. [Si aad wax badan uga ogaato faahfaahinta mashruuca fadlan eeg warqadda Casriyeynta Ida B. Wells ee cusub](#) [Español](#) | [Tiếng Việt](#) | [Русский](#) | [Soomaali](#) | [中文](#)

Habka naqshadeynta ayaa horay u socda

Kooxda mashruucu waxay hadda hagaajinaysaa fikradaha sida dhismaha iyo meelaha bannaan ee ardayda loogu habayn doono goobta. Kooxda La-talinta Naqshadaynta (DAG) ee muwaadiniin hogaaminayaan ayaa la sameeyay, waxayna si joogto ah ula kulmi doonaan naqshadeeyayaasha bilaha soo socda si ay fikrad uga dhiibtaan naqshadaynta. Inta lagu jiro bilaha xagaaga Kooxda Naqshadaynta waxay sii wadi doonaan hagaajinta qorshayaasha qaabaynta dhismaha iyo horumarinta fikradaha goobta.

Fursadaha hawlgelinta dayrta

Marka dugsigu dib u bilaabo dayrta 2024 waxa jiri doona Aqoon-is-weydaarsiyo Naqshadaynta Dadweynaha oo dheeraad ah iyo kulamo halkaas oo aad kula wadaagi karto fikradahaaga kooxda mashruuca. Taariikhaha waxa lagu dhawaaqi doonaa [websaydka](#) bilaha soo socda.

Si joogto ah u booqo websaydka si aad macluumaad dheeraad ah u hesho

Websaydka casriyeynta Ida B. Wells, www.pps.net/IdaBWellsBond ayaa kula socodsiin doontaa wixii ugu dambeeyay ee soo kordha, waxay ku siinaysaa liiska fursadaha ka-qaybgalka ee soo socda iyo bandhigyo kulamadii hore si aad u aragto.

Waad ku mahadsan tahay inaad naga caawisay abuuritaanka Dugsiga Sare Ida B. Wells oo la casriyeeyay qarniga 21aad.